




# Nabad Iyo Saaxiibtimo Ayaa Seef Kasta Ka Wanaagsan

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Wuxaan si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



**Save the Children**



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




# Nabad Iyo Saaxiibtimi Ayaa

## Seef Kasta Ka Wanaagsan

Fasalka 3

Toddobaadka 8



## Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3<sup>aad</sup>.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.


Sababtoo ah waxaa laga rabaa baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raacaa talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudihiiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin,waa in uu baruhu weydiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqtii fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeyaan akhiska sheekada ,baruhu waa in uu waydiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

### Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor


1. Sheeg saaxiibka fiican?



Bariba waxaa dhacay abaar aad u  
daran taas oo ku dhufatay deegaano  
kala duwan. Waxaa gudhay laagihii,  
wabiyadii iyo baliyadii ay duur joogtu  
wax ka cabi jirtay. Xoolihii tabarta  
yaraa way wada dhinteen, waxaana  
meel walba daadsanaa qalfoofka  
xoolaha.

Waxaase duurjoogtii abaartu baabi'isay ka soo hadhay doofaar dhaameel ka dayda sabooyinkii ay biyuhu ka gudheen. Iyo libaax sahal u dila oo dhiigga ka caba xayawaankii abaarta u il darnaa. Dhiig iyo dhaameel kaliya laguma noolaan karee, waxay isku dayeen inay biyo raadsadaan. Waxayna iyagoon is ogayn ay biyo u raadsadeen meesha ugu dhaw biyo.


Waxay socdaanba, saddex habeen dhax kadib ayay waxay isugu yimaadeen meel wabi ah isagoo midwalbaaba iskii u socda. Waxay kaliil iyo kuleyl u adkeystaba, wuxuu qoobabkii iyo cagihii qodxo jiiraanba, waxay isku arkeen hiladii wabiga oo ay biyo ku jiraan. Wuxuuna libaaxii qoorwayne isha ku dhuftay doofaarkii oo ku sii foorarsanaya biyihii. Libaaxii ayaa intaa kadib waxa uu ku soo booday doofaarkii.



Naftu orodbay kugu aamintaaye,  
doofaarkii oo dhan uu u ordo  
waayey ayaa jaantiisa jeeniga midig  
kaga muday. Libaaxii oo tabar xumi  
horayba u haysatay ayaa halkaas  
dhaawac ka soo gaadhay. Doofaarkii  
naf la caariga ahaa ayaa mar labaad  
hardiyey libaaxii. Libaaxiina xuuxin  
iyo xagxagasho ayuu isugu daray  
isagoo dusha iyo dhinacyada ka diirtay  
doofaarkii.

Arrintii oo car itaabo iyo car itaabo taagan tahay, oonkii saddexda maalmood hayeyna u sii dheer yahay. Baa waxay firiyeen geed weyn oo gebiga wabiga ku yaalay. Waxaaba saaran gorgor weynaaday oo abaar iyo oon moog ah, kana noolaaday raqda xoolaha bakhtiyay. Hase yeeshee baryahaan ay yaraadeen xoolihii socod ku soo gaari jiray hiladan wabiga.


Markuu arkay libaaxii iyo doofaarkii jugta isku hayo, oo ay wada dhiigayaan, ayuu qalbiga ka yiri: “Alla kee ugu horeeyaa oo uur ku jirtiisa aan ka noolaan doonaa?” Markii hore, doofaarka ayuu u maleynayay, hase yeeshee markuu arkay sida loo dooxay jeeniga libaaxa, ayuu hadana isagoo hoos u qoslayo yiri: “Aga, midbaan sugayee, waaba labo si xun u dhiig baxayo.



Alla nasiib badniyaa. Gam yalam.  
Ayaan labadoodaba ka siin ayuu  
yidhi!” Libaaxii oo ay tabar ka taalo,  
ayaa yiri: “Ar doofaar, maxaa geedka  
saaran?” Doofaarkii oo ka cabsanayo  
in hadalka lagu gaadayo ayaa yiri:  
“Nin aad dagto oo dam siiso Eebe  
ha ku siiyo!” “Aga, war doqon  
yahow, doofaarka doofaarka ahi, sow  
ma aragtid gorgorkaas geerideenna  
sugayo?”

“Naargale ayaad tahay, meelna ma dayayo mana ku dhagraaricinayo!” ayuu doofaarkii ku qeyliyey. “Ninba ceesaantiis ceel keenye, war i dhagayso, halkaan labadeenna danbaa na wada keentayee!” ayuu libaaxii ku yiri doofaarkii. Doofaarkii oo wali ka madax adeegayo hadalka libaaxa ayaa ugu jawaabay, “War ninba kastiisa ayuu kor tagaayee, warka iga daah kaskaaga ayaad ka warantayee!”


“Hooge, war xaa jo haddaan la rogrogan rag ma helin, war ragbaa Eebe naga dhigay ee...” Intay sidaas isku heysteen ayaa gorgorkii oo haaday. labada baal ku dharbaaxay libaaxii, hase yeeshee doofaarkii oo qooq-qooleynaya carradii uu jaantiisa ku faaganayey kor u seerayo ayaa libaaxii u hiiliyay. Waxa uuna ka cayriyay gorgorkii soo weeraray.



Libaaxii oo dhutinayo ayaa markuu guux iyo gurxan isku daray, ayuu u dhaqaaqay dhanka iyo geedkii uu gorgorku saarnaa. Wuxuu ku booday laan geedka ku taalay markaas ayuu riin iyo ruxis isku daray. Gorgorkii ayaa geedkaa ka haaday, kuna degay geed ka yara fog halka ay joogaan libaaxa iyo doofaarku.

Libaaxii ayaa doofaarkii ku yiri:  
“Doofaar, soco oo biyaha cab anigaa  
gorgorka kaa ilaalinayee.” Doofaarkii  
oo si taxadir ah u socda, hareerahana  
iska eegayo, ayaa hiladii ku dhacay  
biyihiiна ka dhergay. Doofaarkii oo  
dhergay ayaa libaaxii ku yiri:” Anaa  
hadda kaa ilaalinayee, kaalay biyaha  
cab”. Libaaxiina waxa uu aqabalay  
waxa uuna u hinqaday xagay biyuhu  
ku jireen.


Sidii ayuu libaaxii isna ku biyo cabay. Markii labadaba ay dharjeen ayaa doofaarkii ku yiri: “Libaaxow, dhoomaal ma cuntaa?” “Maya, ee adiga hilib ma cuntaa?” ayuu libaaxii isna weydiiyey. “Maya, ee maxaa isku keen diray, oo aan isku dilaynaa?” ayuu doofaarkii yiri. “Berriga iyo biyaha aan wadaagno, ayaa isku keen diray!” ayuu libaaxii yiri.



Doofaarkii oo xikmad la soo daristay baa talo ahaan ku yiri: “Libaaxow, berriga naga ballaadhan, biyahana naga badan. Oo waa nagu wada filan yihiin, ee haddaan isdeyno, maxaa ka qabtaa?” Libaaxii oo qabweynidii lagu yaqaanay wali ku jirto ayaa yiri: “War aniga boqorkii duurjoogta ayaan ahay, ee maxaa talo ah?”

Doofaarkii oo mar labaad libaaxa u caqli celinaya ayaa wuxuu ku yiri: “Aw libaaxow, nabad iyo saaxiibtinimo oo lagu degnaado, ayaa seef kasta ka wanaagsanee, maad nabada qaadatid. Saaxiibtimada haba noo danbeysee?”

Libaaxii oo dabuubta doofaarka markaan garwaaqsaday ayaa yiri: “Oo haddaan saaxiibno, oo iskaashanno, oo iskaalmeysano, sow kama ficiina.



inta aan nabad uun ku ekaan lahayn?”  
Wuu siduu rabay doofaarka, wuxuuna  
isagoo faraxsan ugu jawaabay,  
“Haa, oo marka aan biyaha soo  
doonaneyno aan isasoo raacno, oo  
gorgorka iska difaacno. inta kalena  
qofba dantiisa ha raacdo.” Libaaxii  
baa markaas yiri: “Ma kaa wacad iyo  
balanbaa?” Doofaarkiiba ayaa isna ugu  
jawaabay: “Waa iga wacad iyo balan!”  
Halkiibeyna ku saaxiiben, nabad iyo  
naruurana ugu wada noolaadeen.

## Gunaanadka

Sheekadani waa mid muujinaysa sida  
uu iskaashiga wanaaga u leeyahay.  
Waa mid muujinaysa xilkasnimada ay  
tahay in ruuxu muujiyo si loo gaadho  
nabad iyo iskaashi joogta ah. Waana  
mid inoo cadaynaysa in wadahadalku  
yahay shayga kaliya ii lagu dhamayn  
karo khilaaf iyo kala shaki jira. Hadii  
taas la sameeyana waxaa hubaal  
ah in bulshadu horumar iyo nabad  
gaadhayaan.

## Laylis

Ka jawaab su'aalahn soo socda

1. Xagay isugu yimaadeen doofaarka  
yo libaaxu?
2. Maxay isku qabsadeen doofaarka iyo  
libaaxu?
3. Doofaarku dhaawac noocee ah ayuu  
gaadhsiiyay libaaxa?
4. Doofaarkase maxaa dhaawac ah oo  
la gaadhsiiyay?
5. Maxay ku heshiyeen doofaarkii iyo  
libaaxii?



